Casharka 44

1. Maxaa ku dhacay Sakariyas markii uu ku jiray macbudka?
-Malagga Rabbiga ayaa u muuqday Sakariyas.

2. Muxuu malaggu ku yiri Sakariyas?
-Malaggu wuxuu ku yiri Ilaah baa Sekaryaah siin doona wiil, oo magaciisana waxaa loo bixin doonaa Yooxanaa.

3. Muxuu haddaba malaggu ka leeyahay wiilka Ilaah siinayo Sekariyas?
-Malagga wuxuu leeyahay Sekariyas wiilkiisa Yooxanaa ah, wuxuu dadka u diyaargarayn doonaa Masiixa Imanaya.

4. Maxaa haddaba malaggu ugu yeeray Badbaadiyaha imanaya?
-Sayid ama Rabbi.

5. Waa kuma Rabbiga?
-Ilaah.

6. Muxuu malaggu u sheegay Maryama?
-Malaggu wuxuu Maryama u sheegay in Ilaah u doortay iyada inay noqoto dan uu ka dhalan doono badbaadiyaha iman doona.

7. Muxuu ahaa magaca wiilka Maryama?
-Ciise.

8. Muxuu magaca Ciise ka macne yahay?
-Magaca Ciise wuxuu ka dhigan yahay badbaadiye ama Bixiye.

9. Muxuu haddaba malaggu uga gol lahaa markuu lahaa Wiilka Maryama wuxuu noqonayaa Wiilka Kan ugu sarreeya?
-Wuxuu uga gol lahaa in wiilka Maryama uu noqon doono Wiilka Ilaah.

10. Sidee baa Maryama wiilkeeda uu u noqon karaa Wiilka Ilaah?
-Ilaaha Aabbaha ah iyo Ilaaha Ruuxa Qodduuska ah ayaa waxay Ilaaha Badbaadiyaha ah u sood irayaan dunida isagoo markaa noqonaya Wiilkii Ilaah iyo Wiilka Aadanaha.

11. Miyaa wiilka Maryama uu si buuxda ku noqon karaa Ilaah iyo Aadami?
-Haa.

12. Maxaa wiilka Maryama aanu u lahayn farac aabbe iyo hooyo aadami ah?
-Si Masiixu u dhasho isagoo aan lahayn dembigii Aadan iyo Xaawo.
-Si Masiixu u dhasho isagoo kaamil ah oo aan dembi lahayn.

13. Miyaa Masiixu ahaa Badbaadiyaha Ilaah u ballan qaaday Ibraahim, Isxaaq, Yacquub, iyo dadka oodhan?
-Haa.

-Waxaa haddaba yimid wakhtigii xaaskii Sekariyas ay umuli lahayd ilmaha.

Bal aynu akhrinno Luukos 1:57-58

57-Hadda Elisabet wakhtigii ay umuli lahayd ayaa la joogay, oo wiil bay dhashay.
58-Derisyadeedii iyo xigaalkeedii ayay maqleen siduu Rabbigu naariistiisii ugu weyneeyey iyada, wayna la farxeen.

-Miyaa Ilaah xajinayaa ballankiisa ah inuu Sekariyas iyo Elisabeet siiyo wiil?
-Haa.

-Ilaah wuxuu Sakariyas iyo Elisabeet siiyey wiil, waxaanay ku magacaabeen wiilkoodii Yooxanaa.

-Markii Sakariyas wiilkiisii Yooxanaa ahaa uu dhashay, Ilaaha Ruuxa Qodduuska ah ayaa ku soo degay Sekariyas.

Bal aynu akhrinno Luukos 1:67-71

67-Markaasaa Aabbihiis Sakariyas waxaa ka buuxsamay Ruuxa Qodduuska ah, waxna wuu siis heegay isagoo leh,
68-Ha ammaanmo Rabbiga ah Ilaaha Israa'iil, Waayo, dakiisii ayuu soo booqday oo furtay.
69-Badbaadiye xoog leh ayuu inoogu kiciyey Gurigii mdiidinkiisa Daa'uud.
70-Siduu afkii nebiyadiisii qoduuska ahaa tan iyo bilowgii uga hadli jiray.
71-Inuu inaga badbaadiyo cadaawayaasheenna iyo gacanta kuwa ina neceb oo dhan.

-Muxuu haddaba Sakariyas lahaa?
-Sakariyas wuxuu ammaanayey Ilaah.

-Maxaa Sakariyas Ilaah u ammaanayaa?

-Sakariyas wuxuu garanayey in Ilaah soo diri doono Badbaadiyaha kol dhow.

-Waxaa Sakariyas garanayey in Badbaadiyuhu u imanayo inuu



dadka ka badbaadiyo awoodda dembiga, dhimashada, iyo Shayddaanka.

-Dadka oodhan waay u baahan yihiin in laga badbaadiyo awoodda dembiga, dhimashada iyo Shayddaanka.

-Taasina waxaa weeye asbaabta Ilaah ugu soo dirayo Badbaadiyaha dunidan.

-Sidee buu Sakariyas ku garanayaa in Badbaadiyuhu imanayo oo ddka ka badbaadinayo awoodda dembiga, dhimashada, iyo Shayddaanka?

-Waayo Sekariyas wuxuu wx ka garanayey ama akhriyey kitaabka Ilaah ee Ilaah ku ballanqaaday inuu badbaadiyaha soo diri doono.

-Maxaa kale ee Sekariyas leeyahay?

Bal aynu akhrinno Luukos 1:72-75

72-Iyo inuu u naxariisto awowayaasheen, Iyo inuu adigiisii qoduuska ahaa xusuusto.
73-Oo ahaa dhaartii uu awoweheennii Ibraahim ugu dhaartay,
74-Inuu ina siiyo innagoo cadaawayaasheenna gacmahooda laynagaga bixiyey inaynu baqdinla'aan isaga ugu hawshoonno
75-Qoduusnimada iyo xaqnimada iyaga hortiisa cimrigeenna oo dhan.

-Sekariyas wuxuu granayaa in Ilaah dhowrayo ballankiisii ahaa inuu Badbaadiye soo diri doono.

-Haddaba kaasu waa ballankii Ilaah la dhigtay Iraahim, Isxaaq, iyo Yacquub sannado badan ka hor.

-Ilaah wuxuu mar waliba dhowraa ballammadiisa.
-Ilaah weligii ma jebiyo ballammadiisa.

-Maxaa Sekariyas ka leeyahay ama ka sheegay wiilkiisa Yooxanaa ee isaga u dhashay?

Bal aynu akhrinno Luukos 1:76

76-Adiguna, ilma yahow, waxaa laguugu yeedhi doonaa nebigii Kan ugu sarreeya, Waayo, waxaad hor mari doontaa Rabbiga hortiisa inaad jidadkiisa diyaargaraysid.

-Sekariyas wuxuu leeyahay wiilkiisa Yooxanaa wuxuu noqon doonaa nebiga Kan ugu sarreeya.

-Waakuma Kan Ugu Sarreeya?
-Kan Ugu Sarreeya waa Ilaaha Aabbaha ah.

-Maxay ahayd haddaba shaqada wiilka Sekariyas wiilkiisa Yooxanaa ahi samaynayo?

-Yooxanaa wuxuu ka hor muuqan doonaa Rabbiga, si dadka uu ugu sii diyaariyo.

-Waa kuma Sayidka, Yooxanaa wax u sii diyaargarayn doono?

-Waa Ciise, oo isagu ah Badbaadiyaha.

-Haddaba waa kuma kan keliya ee Nuux iyo reer kiisa ka



badbaadiyey daadka?
-Ilaah.

-Waa kuma kan keliya ee Isxaaq ka badbaadin karay dhimashada oo keenay baraar beddelkiisa gala?
-Ilaah.

-Waa kuma kan keliya ee reer binu Israa'iil ka badbaadiyey addoonsiga iyo Fricoon?
-Ilaah.

-Waa kuma kan keliya ee nebi Yuunis ka samatabbixiyey calooshii nibiriga?
-Ilaah.

-Ilaah oo keliya ayaa inaga samatabbixin kara awoodda dembiga, dhimashada iyo Shayddaanka.

-Maxaa kale ee Sekariyas ka leeyahay wiilkiisa Yooxanaa?

Bal aynu akhrinno Luukos 1:77

77-Oo aad dadkiisa ogeysiisid badbaadada Ee dembidhaafkooda ah.

-Sekariyas wuxuu leeyahay Yoxoanaa wuxuu dadka tusi doonaa waddada ama dariiqa badbaadada.

-Sekariyas wuxuu imminka leeyahay Yooxanaa wuxuu dadka tusi doonaa dariiqa dembigooda lagu bixin doono.

-Muxuu haddaba Sekariyas leeyahay oo akle?

Bal aynu akhrinno Luukos 78-79

78-Eee laga helo naxariista weyn ee Ilaaheenna, Tan qorraxda soo baxda xagga sare inaga soo booqan doonta,
79-Inay iftiimiso kuwa fadhiya gudcurka iyo hooskii dhimashada, Iyo inay cagaheenna jidkii nabadda ku kaxayso.

-Sidee buu haddaba Badbaadiyaha imanaya ula mid noqonayaa qorraxda oo soo baxaysa?

-Tafaasiishu waatan hoos ku qoran:

-Habeen gudcur ah, oo aanu xita jirin ilayskii dayaxa iyo xiddigaha, waa khasab inaad ku lumayso kayn aadan garanaynin.

-Marka haddaba aad ka cabsanayso gudcurka, waxaad si farxad leh ku sugaysaa iftiinka qorraxda ee waaberiga soo kaahi doona.

-Markii Aadan iyo Xaawo ay dembaabeen, waxay ka dhaqaaqeen Ilaah, oo isagu ahaa iftiinka naftooda.

-Dembigooda awgii, ayaa nafsaddoodii ku noqotay ama gashay gudcurka Shayddaanka.

-Dembiga awgii ayaa dadka oodhan waxay ku dhashaan gudcurka Shayddaanka.

-Isla sida ay qorraxda subaxnimo u keento iftiin gudcurka habeennimada dabadeed, ayaa Badbaadiyuhuna wuxuu u imanayaa inuu ilays keeno halkii gudcurka Shayddaanka.

-Haddaba imisa qorrax ayaa dunida maanta aynu ku aragnaa?



-Hal qorrax.

-Isla sida hal qorrax oo keliya ay dunida uga jirto, ayaa haddana waxaa dunida jooa hal Badbaadiye.

-Isla sida qorrax keliya ay u keento ilayska dunida looga baahan yahay, ayaa hal Badbaadiye awood u lahaanayaa inuu badbaadiyo dadka dunida oodhan.

-Ilaah ma uusan ballan qaadin inuu soo diro badbaadiyayaal badan.

-Ilaah wuxuu ballan qaaday inuu soo diro hal Badbaadiye oo keliya.

-Sekaryaah inankiisan Yooxanaa ah wuu koray, wuxuuna aad u rumaystay Ilaah.

Bal aynu akhrinno Luukos 1:80

80-Wiilkuna waa koray oo rxuuxuu ku xoogoobay, wuxuuna joogay cidlada ilaa maalintii uu Israa'iil istusi lahaa.

-Yooxanaa wuxuu ku noolaa lama degaanka ilaa Ilaah u yeeray si dadka uu ugu muujiyo waddada lagu badbaado.